WAXAA DIYAARIYAY GUDDIGA WAALIDKA EE QARANKA EE XANNAANOOYINKA CARRUU[illegible]2012

Buugyare waalidka ka hagaya guddiga waalidka ee xannaanooyinka carruurta ee aagga ay deggan yihiin

Saamaynta waalidka ee xannaanada carruurta

FORELDREUTVALGET FOR BARNEHAGER fub

Waalidku wuxuu xannaanada carruurta u yahay khayraad muhiim ah

Hordhac:

«Bulshada carruurteeda jecel,
waa in ay waalidkooda xannaaneeyaan.»

Waa maxay guddiga waalidka ee degaanka? Waa maxay sababta ay muhiim u tahay in guddi noocaas ah degmo walba laga sameey? Sideese loo sameeyaa? Guddiga waalidka ee xannaanooyinka carruurta (FUB) waa unug qoran oo mas'uuliyad sare leh. Waxaan doonaynaa in aan ka shaqayno in guddiyo gobol laga sameeyo degmooyinka dalka oo idil. Waa arrin waxtar leh oo lagamamaarmaan ah, waana muhiim in waalidka ay carruurtoodu dhigtaan xannaanada carruurta in ay ku mashquulaan nolosha ka jirta xannaanooyinka carruuraha iyo horumarkooda danbe.

FUB waxay qabtaa in waalidku ay si wadajir ah cod weyn oo micne samaynaya u gaarsiin karaan siyaasiyiinta degaanka iyo dawladda iyaga oo kala hadlaya su'aalaha muhiimka ah ee la xiriira xannaanooyinka carruuraha.

FUB waxaa la aasaasay 1-dii ogoosto 2010-kii waxaana muddo afar sano ah magacawda dawladda, iyaga oo ka kooban hoggaamiye, shan xubnood, iyo xubin ku sime ah oo kulammada ka qaybqaadata. Guddigu waalidka ayuu ku matali karaa marar kala duwan oo dalka oo idil ra'yi laga aruurinayo (høringer) iyo shaqooyin kala duwan.

Hadafka guud ee guddigu waa in ay wadashaqayn fiican ka dhex dhacdo xannaanada carruurta iyo guriga, si ay dhammaanba carruurta xannaanada carruurtu u helaan deeqda ugu fiican ee suuragalka ah. Wadashaqayn fiican ayaa simi karta farqiga bulsho waxayna gacan ka geysan kartaa in kala-guurka xannaanada carruurta iyo dugsigu uu si fiican u dhaco.

FUB waxay sidoo kale ka shaqaysaa danaha waalidka ee xannaanada carruurta, waxayna dooneysaa in ay xoojiso xiisaha waalidku arrintan u hayaan iyo saamaynta ay ku leeyihiin xannaanada carruurta iyada oo waalidka la siinayo warbixin iyo hagis.

Degmada ayay mas'uuliyad buuxda ka saaran tahay xannaanada carruurta, marka la eego maalgelinta, meesha ay ku taallo, tayada iyo waxa lagu baranayo. Sidaas darteed waxaa muhiim ah in uu jiro cod waalid oo cad muuqdana kaas oo saamayn ku yeelanaya meelaha xannaanooyinka carruurta laga dhisayo, tayada deeqda iyo inta uu la ekaanayo dhaqaalaha lagu bixinayo socodsiinta xannaanada carruurta.

Jawi wadashaqayn oo wanaagsan oo dhex mara waalidka iyo shaqaalaha xannaanada carruurta ayaa sare u qaadaya tayada deeqda, waxa ugu muhiimsan ee ay bulshadu maanta carruurta siin kartana waa xannaanooyin carruur oo tayo wanaagsan leh.

Shaqo wanaagsan ayaannu idin leennahay!

Oslo, 2012

Guddiga waalidka ee xannaanooyinka carruurta
v/Lena Jensen
hoggaamiso

Muxuu dhigayaa sharciga xannaanooyinka carruurtu?

BAARAGARAAFKA HADAFKA SHARCIGA XANNAANADA CARRUURTA
Ee § 1-aad ee sharciga xannaanooyinka carruuraha Hadaf, farqadda koowaad, waxaa ku qoran:

> Xannaanada carruurtu waxay iyada oo wadashaqayn iyo is-fahan guriga la leh ka taxaddaraysaa baahida ay ilmuhu u qabaan daryeelka iyo ciyaarta, oo horumarinaysaa waxbarasho iyo barbaarin aasaas looga dhigayo horumar dhinac walba ah.
> Xannaanada carruurtu waxay ku salaynaysaa waxyaalaha qiimaha leh ee aasaasiga ah marka la eego diinta masiixiga iyo waxyaalaha la dhaxlay iyo caadooyinka bani'aadminimada ku salaysan sida ixtiraamidda qiimaha bani'aadamka iyo bey'adda, xorriyadda fikirka, jeclaanta dadka, cafinta, sinnaan iyo midnimo, waxyaalo qiimo leh oo ku jira diimo iyo waxyaalo la aamminsan yahay oo kala duwan kuwaas oo ku salaysan xaquuqda aadanaha.

Jumladda koowaad ee qiilka shaqrcigu waxay dhab ahaanti sheegeysaa in wax alla wixii shaqo ah ee ilmaha loogu qabanayo xannaanada carruurta in loo baahan yahay in lagu qabto iyada oo is-fahan iyo wadashaqayn guriga lala yeelanayo.

Xannaanooyinka carruuruhu way ku kala duwan yihiin sida ay uga soo baxaan shuruudaha hadafka sharciga. Waxaa xannaano carruur oo walba looga baahan yahay in ay lahaato istaraatiijiyad ku saabsan sidii loo hubin lahaa loogana taxaddari lahaa wadashaqaynta waalidka.

BAARAGARAAFKA WAXYAALAHA OO KU KOOBAN YAHAY SHARCIGA XANNAANOOYINKA CARRUURTA EE
Sharciga xannaanooyinka carruurta qodobka § 2-aad waxa uu ka kooban yahay, faraqa ugu danbeeya, waxaa ku qoran:

> Iyada oo laga duulayo qorshaha guud ee xannaanada carruurta ayuu guddiga wadashaqaynta ee xannaano carruur ee walba loo baahan yahay in uu dejiyo qorsha-sanadeedka hawsha barbaarinta.

Qiilka sharciga ayay ku qoran tahay in waalidka, iyaga oo soo maraya matalayaasha waalidka ee guddiga wadashaqaynta ee xannaanada carruurta, looga baahan yahay in ay ka qaybqaataan dejinta qorsha-sanadeedka hawsha barbaarinta ee xannaanada carruurta.

GO'AAMMADA SHARCIGA XANNAANADA CARRUURTA EE KU SAABSAN SAAMAYNTA WAALIDKA
Ee Sharciga xannaanooyinka carruurta qodobka § 4-aad Guddiga waalidka iyo guddiga wadashaqaynta waxaa ku qoran:

> Si loo hubiyo wadashaqaynta lala leeyahay guriga ilmaha, waxaa xannaano carruur oo walba looga baahan yahay in ay lahaato guddi waalid iyo gole wadashaqayn. Guddiga waalidku wuxuu ka kooban yahay waalidka/dadka ilmaha oo idil mas'uulka ka ah wuxuuna ka shaqaynayaa danta guud isaga oo gacan ka geysanaya in wadashaqaynta ka dhexaysa xannaanada carruurta iyo kooxda waalidku ay abuurto bey'ad xannaano carruur oo wanaagsan. Haddii faahfaahinta qodobka § 15-aad lagu qoray caddad lacag oo ah inta ugu badan ah ee ay waalidku bixinayaan, guddiga waalidka oo keliya ayaa oggolaan kara wixii lacag ah ee waalidka laga rabo ee intaas ka badan. Golaha wadashaqayntu wuxuu noqonayaa unug tala-bixineed, mid xiriir abuuraya oo wax isu duwaya.
>
> Golaha wadashaqayntu wuxuu ka kooban yahay waalidka/dadka carruurta mas'uulka ka ah iyo shaqaalaha xannaanada carruurta, hab kooxaha loo matalayo si isku mid ah. Mulkiilaha xannaanada carruurtu wuu ka qaybqaadan karaa haddii uu doonayo, laakiin ugama qaybqaadan karo matalayaal ka badan mid kasta oo ka mid ah kooxaha kale marka gooni-gooni loo eego.
>
> Mulkiilaha xannaanada carruurta waxaa looga baahan yahay in uu hubiyo in kiisaska muhiimka ah la soo hor dhigo guddiga waalidka iyo golaha wadashaqaynta.

Sharciga xannaanada carruurta waxaa ku jira qiil sharci oo sheegaya in xannaano carruur oo walba laga sameeyo guddi waalid iyo gole wadashaqayn, laakiin sharciga kuma jiro qodob oranaya in la sameeyo golaha wadashaqaynta ee waalidka (FAU), sida uu Sharciga waxbariddu dhigayo marka la eego xagga dugsiyada.

Sharciga xataa qiil loogama hayo in la sameeyo abuurista gole loogu talo galay waalidka ay carruurtu u dhigtaan xannaanooyinka carruuraha ee degmo walba. Golaha waalidka ee qaranka, FUB, ayaa si kastaba waxaa hiigsigiisu yahay in golayaal waalid laga sameeyo dhammaanba degmooyinka dalka, waxaanay doonayaan in ay ka shaqeeyaan sidii hadafkaan lagu gaari lahaa.

Waa maxay gole waalid oo degaanka ah?

GOLE WAALID OO DEGANAAKA AH

Degmooyinka ilaa xad le'eg ee leh xannaanooyin carruureed oo badan, waa in ay go'aan ka gaaraan inta xubnood ee ku habboon in ay ku jiraan gole waalid oo degaan. Haddii uu goluhu ka kooban yahay xubno badan waxaa markaas adkaanaysa in si wanaagsan loo maammulo. Waxaa kale oo loo baahan yahay in laga shaqeeyo in xubnaha FUB ee degaanka ay ka kooban yihin dad isku dhaf ah oo ka kala yimid xannaanooyinka kala duwan ee degmada.

GOLE WAALID OO DEGAAN WAXAA LOO MAGACAABI KARAA HABAB KALA DUWAN:

- in ay waalidka laftigoodu magacaabaan
- in ay degmadu magacawdo tusaale ahaan guddoomiyaha degmada iyo / ama duqa magaalada
- in ay magacawdo «koox shaqo» oo degaanka ka jirta
- Warbixin intan ka badan oo ku saabsan isku-dhafka golaha ka eeg bogga 14-aad.

YAA LOO BAAHAN YAHAY IN AY KU JIRAAN GOLAHA WAALIDKA?

Xubnaha golaha degaanka waxaa laga soo dooran karaa dad matalaya golaha shaqada (FAU) ama golaha wadashaqaynta ee (SU) ee xannaanooyinka kala duwan. Xubnaha golaha degaanka waa in uu doortaa guddiga waalidka ee xaannanada carruurta.

Waa maxay sababta ay muhiimka u tahay?

GOLAHA WAALIDKA EE DEGAANKU WAA MUHIIM MAXAA YEELAY:

- waalidku waxay matalayaan codka carruurta oo soo gaarsiinayaan xannaanooyinka carruuraha
- waalidku waxay dalbi karaan in laga hadlo hadba xaaladaha taagan, oo ay ka mid yihiin mawduucyada laga yaabo in aanay dadka kale u muuqan
- waxay ilaaliyaan hadafka sharciga xannaanooyinka carruurta ee § 1. Hadaf
- hubin karaan in ay tayo isku mid ah ka jirto dhammaan xannaanooyinka carruurta ee degmada
- yarayn karaan kala-duwanaanta bulshada
- wadashaqayn wanaagsan oo dhex marta waalidka iyo shaqaalaha xannaanada carruurta waxay saamaynaysaa tayada deeqda carruurta loo fidiyo, taas oo haddana saamaynaysa horumarka iyo waxbarashada carruurta

IN LA MUUJIYO CODKA WAALIDKA

Codka waalidka, gaar ahaan waalidka ay carruurtu u dhigtaan xannaanada carruurta, waxaa caado ahayd in aan codkooda aad loo maqlin. Haddii uu degaanka ka jiro gole waalid waxaa waalidka ay carruurtu u dhigtaan xannaanada carruurta u suuragaleysa in ay degmadu codkooda maqasho, si loo xoojiyo fursadda ay waalidku u leeyihiin in ay saamayn ku yeeshaan isbeddellada ku dhacaya xannaanooyinka carruurta.

Waalidku way kala duwan yihiin sida dadka kaleba ay u kala duwan yihiin, fikrado kala duwan iyo baahiyo kala duwan ayayna qabaan. Laakiin waa maxay waxa ay waalidku ka siman yihiin ee noqonaya doodda muhiimka ah marka la eego sidii ay degmadu u samayn lahayd FUB degaanka ah?

WAXA AY WAALIDKU WADAAGAAN MARKA LA EEGO XANNAANADOODA CARRUURTA WAA:

- Tayo
- Ammaan
- Wakhtiyada furitaanka
- Mawduucyada/waxyaalaha lagu qabto xannaanada carruurta

Dhammaan FUB-ga ka jira degaanka waxay leeyihiin qorsha ay ku hawlgalaan, qorshahaasina waa in uu ahaadaa mid ku saabsan sida carruurta u roon. FUB-ga degaanku wuxuu noqon karaa gole ay wadaagaan oo warka ku kala qaataan waalidka ay carruurtu u dhigtaan xannaanada carruurta, unug ay waalidka iyo maammulka degmadu ay ku heli karaan xalal wanaagsan kuwaas oo u fiican carruurta dhigata xannaanada carruurta. Sidaas ayuu FUB-ga degaanku wuxuu ku noqon karaa afhayeenka waalidka degmada ee ay carruurtoodu dhigtaan xannaanada carruurta. Maammulka degmada iyo siyaasiyiinta degaanka waxaa iyagana waxtar weyn u yeelan kara in ay jirto koox waalid oo isku dubaridan kuwaas oo ay la xaajoodaan lana shaqeeyaan.

U SOO JEEDISTA WAALIDKA.

U soo jeedista waalidku ay u soo jeedaan su'aasha ah tayada iyo waxa lagu qabto xannaanada carruurta ayaa ah mid sii kordheysa. Kaddib markii sharciga xannaanooyinka carruurta lagu daray xaqa loo leeyahay boos xannaano carruur, ilmo kastana uu Norway helay boos xannaano carruureed, ayaanay waalidku u baahnayn in ay wakhti iyo tamar badan ku lumiyaan sidii ay ilmahooda ugu heli lahaayeen boos xannaano carruur. Waxaa markaa waalidku inta badan xoogga saaraan tayada iyo waxa lagu qabto xannaanada carruurta. Tani waa arrin wanaagsan, oo keeneysa in waalidku in intii hore ka badan ay dalbaan tayo wanaagsan. U soo jeedidda iyo xiiseynta ay waalidku xiisaynayaan tayada deeqda xannaanada carruurtu waa muhiim, waalidkuna waa in ay codkooda u iticmaalaan sidii ay arrintan ugu gudbin lahaayeen mas'uuliyiinta degmada iyo dadka la doorto.

Sidee ayaa hawsha loo billaabaa?

MA DEGMADA MISE WAALIDKA AYAA TILLAABADA KOOWAAD QAADAYA?

Waxaa laga yaabaa in waxa ugu muhiimsan aanay ahayn cidda soo jeedisa golaha waalidka ee degaanka, laakiin muhiimaddu waa waa in la sameeyo gole noocan ah. Waxaa muhiim ah in golaha waalidku yahay mid ay ka war hayaan madaxda maammulka iyo siyaasadda ee degmada. Haddii ay tahay degmada cidda soo jeedisay in la sameeyo gole waalid oo degaanka ka jira, markaa madaxdu si wanaagsan ayay uga war hayaan golaha. Laakiin haddii ay waalidku billaabaan gole ka jira degaanka, waxaa laga yaabaa in ay wanaagsan tahay in kulan laga codsado madaxda degmada loona codsado sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah, si xiriir loo abuuro marka danbana loo suurageliyo in ay wadashaqayni dhacdo. Horumarka danbe ee golaha ayay muhiim weyn u tahay in degmadu soo dhoweyso soojeedinta waalidka oo ay waalidka siiyaan aqoonsiga ay u baahan yihiin billowgaba. Waa mid muhiim ah in ay wadashaqayn waxtar leh oo wanaagsan dhex marto golaha waalidka iyo maammulka degmada. Golaha waalidku waa in aan la arkin keliya marka ay jiraan arrimo ay doonayaan in ay u dagaallamaan, laakiin waa in la sameeyaa nidaamyo suuragelinaya in waalidka iyo degmada oo wada jira ay arrimaha dhici kara ka hor tagaan iyada oo ay waalidku dareemayaan in ay saamayn dhab ah meesha ku leeyihiin. Waxyaalaha loo baahan yahay waxaa ka mid ah in ay waalidku la socdaan waxa lagu dhigto xannaanada carruurta iyo hawsha loo igmaday xannaanada carruurta marka la eego xag barbaarin iyo xag bulsho labadaba. Si wadajir ah ayay kooxaha wadashaqaynaya waxay si wanaagsan ugu qeexi karaan wixi lagu qaban lahaa FUB-ta degaanka, si ay u suurtagasho in waalidku arrinta xiise u tusaan. Wadashaqayntu waa in ay ahaataa mid la wadaagayo fikrado isu miisaaman, halkaas oo ay labada kooxoodba ay kiisaskooda la imaanayaan miiska wadaxaajoodka. Haddii loo baahan yahay in wadashaqaynta lagu guuleysto, waa in uu maammulka degmadu oggolaadaa kuna casumaa ka-qaybqaadasho. Billow wanaagsan ee wadashaqaynta mustaqbalka ayaa waxaa noqon kara in la kala caddeeyo cid walba iyo waxa ay cidda kale ka fileyso iyo waxa loo yaqaanno is-ixtiraamid labada dhinacba ah.

Maammulka degmadu waa muhim marka la eego isku-dubaridka sidii arrinta loogu soo joosan lahaa ayna waalidku ugu soo biiri lahaayeen FUB-da degaanka. Sida ugu fiican waa in la helo wadashaqayn saddex-geesood ah; Waalid – maammul degmo – siyaasiyiinta degaanka, halkaas oo dhammaan la yahay kooxo dhab ah oo wax soo jeedin kara. Sida ugu wanaagsanna waa haddii wadashaqaynta la billaabo «xilli ay nabadi jirto» iyada oo la yeelanayo meel lagu wada kulmo, wakhtiyo la kulmayo, jadwal sanadeed (årshjul) kulammada iyo warbixinta oo si wanaagsan laysu weydaarsado. Habka warbixinta ee degmada waa in la caddeeyaa, si loo hubiyo in warbixinta muhiimka ah ee uu maammulka degmadu u gudbinayo waalidka isaga oo u marinaya guddiga waalidka iyo/ama SU-ga ay waalidka gaarto.

Waxaa tusaale ahaan dhici karta in uu maammulka degmadu diyaariyo qoraal dadweynaha loogu talo galay oo ku saabsan FUB-ga degaanka, taas oo loo dirayo dhammaan waalidka cusub ee ay carruuri u dhigato xannaano carruur, si loo hubiyo in ay dadka oo idil helaan warbixin isku mid ah. Waxaa wanaagsan in la sameeyo hay'ad xoog leh taas oo ka hortageysa in unugga iyo wadashaqayntu ay noqdaan kuwo qof ku xiran.

Maammulka degmadu kaalin wuu ku lahaan karaa «socodsiinta» FUB-ga degaanka si loo hubiyo in ay hawshu sii socoto, laakiin isaga oo aan maammulka faragelin ku samaynayn hawl-hoosaadka FUB. Waxaa sidoo kale iyana muhiim ah in la sameeyo baro ay ku kulmaan FUB iyo siyaasiyiinta, si ay FUB-ga degaanka ugu suurtagasho in ay siyaasiyiinta wax gaarsiin karaan.

SIDEE AYAAD UGA QAYBQAADAN KARTAA ADIGA OO WAALID AH?

Waalidka doonaya in ay gole waalid degaan aasaasaan waxay tusaale ahaan samayn karaan sida soo socota:

- La xiriir guddoomiyaha degmada iyo / ama cidda degmada u qaabbilsan xannaanooyinka carruuraha oo kulan ka codso, kulankaas oo lagu gorfeynayo gole degaan.
- Casumaad u dir dhammaan dadka matala SU-yada xannaanooyinka carruurta ee degmada ha ahaadeen kuwa ay degmadu leeyahay ama kuwo barayfat ah oo ku casun kulan warbixin ah oo ku saabsan qorshaynta gole waalid oo degaanka ah.
- Gole lagu shiro ka amaahso degmada sida guriga degaanka ama dhisme kale oo dawladeed sida dugsi ama xannaano carruur, dabadeedna casumaad u fidi qofka degmada u qaabbilsan xannaanooyinka carruurta, guddoomiyaha degmada iyo/ ama duqa magaalada.
- Kulanka warbixinta uga faa'iideyso sidii aad ku heli lahayd xubnaha ugu badan ee suurtagalka ah ee ku biiri kara golaha degaanka ee la aasaasayo, diyaarina wakhtiga kulanka koowaad ee golaha iyo meesha uu ka dhici doono.

Maxaa la qaban karaa?

Waalidku waxay doonayaan deeq xannaano carruur oo tayo sare leh. Waalidku iyaga oo arrinta u soo jeesanaya ayay gacan ka geysan karaan sidii tayada sare loogu qaadi lahaa, taas oo ay samayn karaan iyaga oo su'aalo dhiibanaya, dalab soo gudbinaya soona jeedinaya waxyaalo la xiriira socodsiinta xannaanada carruurta iyo waxa lagu baranayo.

SI WADAJIR AH SARE UGU QAADIDDA ARRIMAHA XANNAANOOYINKA CARRUURTA

Marka waalidka iyo shaqaaluhu ay si wadajir ah sare ugu qaadaan arrimaha xanna-anooyinka carruurta, waxay taasi sare u qaadaysa culayska ay arrintu ku leedahay tusaale ahaan siyaasiyiinta.

Haddii uu jiro gole degaan oo waalid waxaa markaas fududaanaysa in sare loo qaado codka waalidka ay carruurtoodu dhigtaan xannaanada carruurta oo la gaarsiiyo heer degmo, tusaale ahaan marka la eego miisaaniyad, qorshayaal sanad, shaqaale ama isticmaalka shaqaalaha ku meelgaarka ah. Tani waxay haddana xoojin kartaa saamaynta ay waalidku ku leeyihiin horumarka xannaanooyinka carruuraha

QORAALKII GOLAHA SHACABKA EE XANNAANOOYINKA CARRUURAHA EE MUSTAQBALKA

hordhaca (NOU 2012:1: Sida carruurta u roon) qoraalki Golaha shacabka ee 2013-ka kuna saabsanaa xannaanooyinka carruuraha ee mustaqbalka waxaa ku qornaa:

> «Golaha waalidka ee degmada/degaanka waxaa la qiyaasayaa in ay saamayn wanaagsan ku yeelan karaan horumarka xannaanada carruurta ee degaanka, iyaga oo tusaale ahaan noqonaya hay'ad fikraddeeda la dhegeysto marka la diyaarinayo siyaasadda xanna-anada carruurta ee degaanka.»

Tani waa mid muhiim ah marka loo eego si uu u kordhiyo xoogga codka waalidka ee degaanka, iyo in ay waalidku iyaga oo wada jira saamayn ku yeelan karaan in deeqda xannaanooyinka carruuraha ee degmo walba loo habeeyo sida ilmaha ugu habboon.

FUB WAXAY NOQON KARAAN KUWO WAX TAAGEERA OO KIISKA AYAY GAARSIIN KARAAN HEERKA UGU SARREEYA

Golaha waalidka ee xannaanooyinka carruurta (FUB) waxaa loo sameeyay heer qaran. Golayaasha degmada iyo kuwa degaanku waxay FUB u tahay gole dalka oo idil ka jira oo ay kala xiriiraan kiisaska khuseeya xiriirka guriga iyo xannaanada carruurta.

FUB waxay noqon karaan kuwo taageera oo kiisaska u gudbiya Agaasinka waxbarashada.

Isuku dhafidda golaha waalidka

TIRADA XUBNAHA

Xubnaha golaha degmada waxaa laga soo dooran karaa matalayaasha waalidka ee golayaasha waalidka iyo golayaasha wadashaqaynta ee xannaanooyinka kala duwan. Tirada xubnaha waa in degmo kasta goonideeda loo eegaa, iyada oo taas lagu qiimaynayo inta ay degmadu le'eg tahay iyo tirada xannaanooyinka carruurta. Degmooyinka yaryar waxay golaha waalidku dooran karaan in ay isu geeyaan xannaano carruur iyo dugsi ama ay ka gudbaan xadka xudduudaha, haddii ay tirada waalidka ee golaha mustaqbalku yar tahay.

HABAYNTA GOLAHA

Isku dhafka rasmiga ah ee gole deegaan wuxuu noqon karaa:

- Hoggaamiye
- Hoggaamiye ku xigaan
- Xumno gole maammul
- Xoghaye
- Xubin ku-sime ah
- Khasnaji

GOOBAHA FUB

Goobaha FUB-ta deegaanku ay ku wada xiriiri karaan oo lagu muujin karo:

- Bogga internetka ee degmada
- Facebook
- Ururrada danaha gaarka ah sida tusaale ahaan waalidka ku hadla luuqadaha laga badan yahay iyo/ama waalidka leh carruur u baahan caawin
- Kulammo joogto ah oo lixdii biloodba mar ah iyo meelo lagula kulmo madaxda iyo siyaasiyiinta degmada

HAWLAHA GOLAHA WAALIDKA.

Waxaa jira mawduucyo badan iyo kiisas uu FUB-ta degaanku ka wada hadli karo oo uu ka baaraandegi karo, tusaale ahaan: sidee ayaa loo hubinayaa in ay waalidku la socdaan arrimaha markaas taagan? Waa maxay arrimaha ugu muhiimsan ee loo baahan yahay in ay golaha waalidku ka shaqeeyaan? Sidee ayaa loo suurageliyaa dood miisaaman oo ku saabsan tayada iyo waxa lagu qabanayo xannaanada carruurta? Waa maxay tayo marka laga hadlayo xannaano carruur?

ARRIMO SIDEE AH AYUU GUDDIGU KA BAARAANDEGAYAA?

Waxaa muhiim ah in ay golaha degaanku xoogga saaraan arrimaha waaweyn ee degmada oo idil khuseeya, kuwaas oo khuseeya xannaanooyinka carruurta ee degmada oo idil, ciddii doonto ha lahaato e. Waxyaalahan ayaa tusaale ahaan noqon kara kuwo muhiim ah:

- Inta ay xannaanada carruurtu le'eg tahay
- Dadka waaweyn ee jooga
- Macallimiinta jooga
- Aqoonta shaqaalaha

Khayraadka dhaqaalaha ayaa hubinaya tayo wanaagsan, laakiin arrimaha la soo sheegay ayay tayadu ku xiran tahay.

Waxyaalaha dhismaha la xiriira laftigoodu saamayn ayay ku yeeshaan tayada. Talo wanaagsan ayaa ah in kiisaska loo doorto si waafaqsan jadwal sanadeed (årshjul), Tusaale ahaan miisaaniyad, qorshe sanadeed, dib u eegista qorshaha sanadka, qaadashada, aqoonta iyo billaabista, kuwaas oo ah waxyaalo joogto ah oo dhaca sanad xannaano-carruureedka. Golaha waalidka ee degaanku wuxuu codsan karaa in loo soo diro arrimaha micnaha samaynaya ee leh muhiimad sare kana yimaada FAU/SU-ga xannaano carruureed oo gaarka ah.

Golaha waalidku wuxuu sidoo kale ka duuli karaa qorshayaasha kulammada iyo liiska arrimaha loo gudbiyo Golaha guud ee korriinka, Guddiga degmada (Formannskapet) iyo/ama Golaha maammulka degmada (Kommunestyret) ee degmo walba, iyaga oo dabadeedna arrimaha markaas taagan soo hor dhigaya kulammada golayaashooda.

SIDAAN AYAA LOOGA SHAQEEYAA DEGMADA KRISTIANSAND.

Degmada Kristiansand waxay xannaanooyinka carruuraha u samaysatay gole waalid oo degaan. Golaha waxaa la yiraahdaa Golaha waalidka ee xannaanada carruurta (BAFU). BAFU waxaa lagu daraa nidaamka go'aan qaadashada degmada, marinka kiisaskuna waa sida soo socota:

1. Golaha wadashaqaynta ee xannaanada carruurta
2. Golaha waalidka ee xannaanada carruurta (BAFU)
3. Agaasimaha korriinka
4. Guddiha korriinka

Heerka arrinta go'aanka looga gaarayo waxay ku xiran tahay waxa laga hadlayo. Arrimaha maammulka ah waxaa go'aankooda gaara agaasimaha korriinka. Arrimaha waaweyn waxaa go'aankooda gaara guddiga korriinka ama guddiga degmada (Bystyret) iyaga oo siyaasad ahaan u gelaya.

Moodeelka degmada Kristiansand ayaa noqon kara mid lagu daydo ama hagis u noqda sidi uu noqonayo marinka arrinta ee u dhexeeya golaha waalidka ee degaanka iyo maammulka degmada.

MARAR INTEE DHAN AYAA KULAMMO LA QABANAYAA?

Dabcan gole walba isaga ayay u taallaa inta jeer ee uu doonayo loona baahan yahay in la qabto kulammo gole. Kulammada waxaa laga hor marin karaa ama laga dib dhigi karaa shirarka maammullada degmooyinka (By-/Kommunestyremøtene), si arrimaha markaas taagan looga baaraandego inta ay weli cusub yihiin. Degmooyin badan ayuu tan macnaheedu noqonayaa in uu goluhu kulan qabto bishiiba hal mar, kuwaas oo noqon kara kuwo badan oo aan loo baahnayn. In labo ilaa afar jeer sanadkiiba kulan la qabto ayaa ah mid ka macquulsan fulinteeduna ka fududdahay.

GO'AAMMO.

Waxaa wanaagsan in uu golaha degaanku shaqada ka dhigo mid rasmi ah oo golaha loo sameeyo go'aammo, iyada oo aan shaqada la badinnin. Go'aammada goluhu waxay tusaale ahaan ka koobnaan karaan kuwo sharraxaya meelaha soo socda:

- Hadaf
- Xubno
- Kulammo gole
- Tixraac iyo habdhaqan tixraac
- Kalfadhi sanadeed
- Guddi doorasho
- Miisaaniyad iyo xisaab
- Xisaabiye
- Kooxo shaqo (tusaale ahaan kooxo marki loo baahdo ah)
- Beddelidda go'aammada
- Baabbi'in

«Maxaa ilmaha loo bixinayaa»?

Gole waalid oo degaan waa in uu soo jiitaa waalidka xannaanooyinka carruurta ee degmada iyo kuwa barayfatka ah labadaba oo uu noqdaa unug madaxbannaan. Goluhu wuxuu matalayaa dhammaanba waalidka ay carruuri u dhigtaan xannaanooyinka degmada, sidaas darteedna looma baahna in uu ku xirnaado siyaasad iyo mulkiilayaal gaar ah midna. Magaca goluhu waa in uu noqdaa midka ugu dhexdhexaadsan ee suuragalka ah, sidaas darteed ayuu FUB-ka qaranku wuxuu soo jeediyaa in golayaasha waalidka ee degmooyinka Norway ay la baxaan FUB uu la socdo magaca degmada, tusaale ahaan FUB Oslo. Sidaas ayayna golayaasha degaanku ku noqonayaa kuwa matalaya FUB qaran.

Gabagabo

Golaha waalidka ee xannaanooyinka carruurtu waxay aamminsan yihiin in ay isku-duubnida waalidka iyo in hal cod lagu hadlo in ay waxtar u leedahay sidii codka loo gaarsiin lahaa mas'uuliyiinta go'aanka gaara, maammulka degmada iyo dadka maaddada bartay ee ka socda xannaanooyinka carruurta ilaa heerka machadyada.

Waalidku waa dadka ugu muhiimsan nolosha carruurta, xannaanada carruurtana waxay u yihiin qof ay la shaqeeyaan oo qiime weyn u leh, waalidku waa in ay xannaanada carruurta u soo jeestaan noqdaanna qayb muhiim ah oo ka mid ah nolosha ka jirta xannaanada carruurta.

Ka faa'iideyso fursadda!

FUB

TELEEFAN	22 05 90 70
CIWAAN BOOSTO	Postboks 9360 Grønland, 0135 Oslo
CIWAAN BOOQASHO	Schweigaards gate 15 B, 0191 Oslo
IIMAYL	post@fubhg.no
BAR INTERNET	www@fubhg.no
SAWIRKA	Bogga hore: Berit Roald/NTB scanpix Bogagga 6, 8 iyo 12: Istockphoto
DESIGN	Tank